

# Badbaadada carruurta baabuurta dhexdooda – masuuliyadda dadka qaangaarka ah.



Waalidiinta carruurta dugsiga ku jirta, da'da 6-12



Baabuur nabad ah

# Kaalintaada waalid ahaan ayaa muhiim ah

**Mujtamaceena ayaa si joogto ah isku beddelaya. Magaalooyinku way ballaaranayaan, gaadiidka dugsiga ayaa is beddelaya, kaabayaasha ayaa dib loo dhisayaa, isla sida meelaha ay carruurta laftigoodu joogaan ama ku jiraan. Sanadihii ugu dambeeyey waxay carruurta yeeshen qalqaalin dheeraad ah, taasoo ka dhigan in kaalinta waalidiintu ay si joogto ah isku beddelayso. Haddana shaki kama jiro in kaalintaada waalid ahaantu ay weli daruuri u tahay badbaadada ilmahaaga marka uu baabuurta dhex marayo.**

Waxaa muhiim ah in carruurta masuuliyad la saaro si iyaga loogu suurto geliyo in ay koraan oo ay noqdaan shakhsiyaad xoog leh, oo madaxbannaan, iyo si ay u bartaan in ay go'aanno macquul ah qaataan. Laakiin waxaa weliba muhiim ah in carruurta la saaro masuuliyad ay qaadi karaan.

Dugsiga hoose dhexdiisa, maamulaha dugsiga ayaa ka masuul ah in uu hubiyo in mawduucyada aqoonta ee is dhaafsan – sida badbaadada baabuurta dhexdooda – lagu daro maaddooyinka

kaladuwan ee dugsiga lagu dhigo. Waxbarashada badbaadada baabuurta ee dugsigu waxay aad ugu kaladuwan tahay dugsiba dugsiga kale, waxayna weliba is beddeshay sanadihii la soo dhaafay. Waqtigii hore, waxay dugsiyadu xoogga saari jireen in “carruurta la baro in ay masuul ka noqdaan badbaadadooda”. Maalmahan dambe, shaqada ay dugsiyadu qabtaan waxay ku salaysan tahay sidii carruurta looga caawin lahaa in ay fahaan ka helaan halisaha waddada, taasoo gebi ahaanteed ku salaysan waayo aragnimadooda iyo koritaankooda. Dugsiyada farabadan, waalidiinta ayaa weliba looga qayb geliyaa dadaalka dugsigu wado.

Dhanka khuburrada aqoon u leh badbaadada carruurta ee baabuurta dhexdooda, waxaa in badan laga warhayaa in dadka qaangaarka ahi ay marwalba masuul ka yihiin badbaadada carruurta ee baabuurta dhexdooda. Waxaa muhiim ah in adiga waalidku tan xasuusato.

**Dadka qaangaarka ah ayaa ka masuul ah badbaadada carruurta marka ay baabuurta dhex marayaan!**



# Awoodaha iyo xirfadaha jirka iyo maskaxda.

**Waxaa adag in la tilmaamo da'da khaaska ah ee ay carruurta intooda ugu badan ku awoodaan in ay keligood isku dabbaaraan dhex maridda baabuurta.**

Dhulka baabuurta leh ayaa aad u kala duwanaan kara, laakiin carruurta ayaa iyaguna kala duwan. Guud ahaanba waxaa xeer laga dhigan karaa in carruurta ay dugsiga u lugayn karaan marka ay joogaan 9 ilaa 10 jir xaafadaha ay baabuurta meeldhexaad ugu badan tahay, oo ay baaskiil ku dhex mari karaan baabuurta marka ay joogaan 11 ilaa 12 jir – laakiin runtii waxaa jira dhulal baabuur leh oo aanay habboonayn in ay carruurta marnaba keligood ku maraan. Sidaas ha ahaatee, haddana carruurta yar yar baaskiil ayay keligood dugsiga ku tagi karaan haddii ay jiraan dariiqo baaskiillada loogu talagalay oo nabad ah, amni leh oo aanan kala go'nayn. Arrinka kale ee jira waxa weeyaan haddii carruurta ay u barten iyo haddii kale dhex maridda baabuurta; awoodidda baaskiil wadista keligaa iskeed uma timaaddo, laakiin waxay u baahan tahay tababar iyo khibrad.



Carruurta yar yar wax badan kama garanayaan fal iyo ficilkiis. Carruurta ma leh waayo aragnimada ama fahanka ay u baahan yihiin si ay u awoodaan in ay baabuurta keligiid dhex wareegaan.

Waxay baran karaan sida xaalado farabadan loola macaamilo, laakiin badi wax kama fiirsadaan. Carruurta ilaa 8 ilaa 10 jir ah iyaguna marwalba si isku mid ah wax uma sameeyaan. Waxaa laga yaabaa in ay maalin habdhaqan nabad ah ka muujiyaan baabuurta dhexdooda, ayna maalinta ku xigta si kadis ah dariiqa ugu cararaan iyagoo kubbad daba ordaya, oo aanan ka warhaynin baabuurta.

Waqtigii hore, waxaan wax ka eegi jirnay dhanka darawalka qaangaarka ah waxaanan u malaynaynay in aan carruurta bari karno in ay habdhaqan nabad ah ka muujiyaan baabuurta dhexdooda marka aan iyaga barno uun xeerasha iyo macnaha calaamadaha waddada ku yaalla. Waxaan iminka ogaannay in aan u baahan nahay in aan wanaajinno fahanka ay carruurta ka haystaan sida baabuurta u socsocoto. Waalidiin farabadan ayaa carruurtooda bara habdhaqanka ay u baahan yihiin in ay muujiyaan marka ay waddada ka tallaabayaan: “Bidix eeg, ka dib midig ka dibna mar kale bidix.” Waxay tani ka dhigan tahay in carruurta ay da’ yar ku garanayaan waxa ay u baahan yihiin in ay sameeyaan marka ay waddada ka tallaabayaan, haddana lama hubo in ay garanayaan sababta, taasoo ka dhigan in ay si fudud u illaawi karaan.

Dhulka baabuurta leh ayaa badi aad u adag in ilmaha dhiniciisa laga fahmo, marka la eego dhererkiisa iyo waxyaabaha hareerihiisa ku qarsoon ee uusan arki karin. Haddii si kale loo dhigo, carruurta waxaa ka maqan xirfadaha jirka iyo maskaxdaba ee la iskugu dabbaro dhulalka baabuurta leh ee adag ee aan abuurnay. Asal ahaan, ninka yar ee cagaaran ee ka muuqda isgoyska dadka lugeeya ay maraan waxuu ka dhigan yahay in aad tallaabi

karto. Ilmaha haba yaraatee caqligal uma aha in gawaaridu ay waddada mari karaan marka ninka cagaaran uu muuqdo.

Ka tallaabidda waddada keligeed ayaa u baahan in dhowr shay laga fikiro taasoo aanay carruur farabadan xammili karin. Carruurta ma aha dad qaangaar ah oo gaagaaban; carruurta waa carruur! Carruurtuna...

...ma buuxsadaan aragga geesaha ilaa ay gaaraan 15 ilaa 16 jir.

...ma kala garan karaan haddii dhawaaqa ay maqlayaan uu soo dhawaanayo ama durkayo.

.....gawaarida dushooda wax ugama arki karaan sida dadka qaangaarka ah. Wayna yar yar yihiin waxaana adag in iyaga baabuurta dhexdooda laga arko.

...waxay ciyaartooda u soo saaraan waddada.

...sida dadka qaangaarka ah uma qiimayn karaan xawaaraha ama masaafada ay gawaarida u jiraan.

...waxyaabo badan mar keliya ma wada samayn karaan – kolba hal wax ayay sameeyaan.

...karti uma leh in ay la yimaadaan fikir guud oo dhammaystiran ka hor inta aanay gaarin 10 ilaa 11 jir.



# Ilmaha gaariga ku jira.

**Gaariga iyo nidaamyada badbaadada gaariga – suumanka kuraasta, bacaha hawadu ku jirto iyo kuraasta – waxaa lagu hagaajiyey oo lagu qiyaasay jirka qofka qaangaarka ah.**

Carruurta way ka yar yihiin oo qiyaasaha qaybaha jirkooda ayaa ka duwan kuwa dadka qaangaarka ah. Waxay tani ka dhigan tahay in ay carruurta ka nugayl badan yihiin marka shil baabuur yimaaddo waxayna u baahan yihiin in la isticmaalo qalab lagu dhawro oo da'dooda loogu talagalay.

Waddanka Iswiidhan gudihisa, waxuu sharcigu dhigayaa in dadka gaariga saaran ay dhammaantood xirtaan suunka kursiga, ha ku jiraan xagga hore iyo xagga dambeba. Carruurta ka gaaban 135 cm waa in iyaga weliba loo isticmaalo kursi badbaado gaar ah: kursi dhallaan, kursi badbaado oo carruurta lagu xajiyo, kursi kor loogu qaado ama barkimo kor loogu qaado.

Kursiga badbaadadu waa in uu yeesho calaamadda ansixinta E ama ansixinta i-Size. Waa in uu ilmaha ku habboon

yahay waana in loo rakibo loona isticmaalo sidii loogu talagalay. Waa in darawalku hubiyo in rakaabka 15 jir ka yari ay isticmaalaan suumanka kuraasta iyo/ama kuraasta kalee badbaadada.

Waxaa ugu muhiimsan in carruurta loo isticmaalo kuraasta kor loogu qaado ama barkimooyinka kor loogu qaado ilaa ay gaarayaan 10 ilaa 12 jir. Baaluqa ka hor jirka ilmuhu uma korin heer uu suunka ugu xajin karo bowdaha haddii lagu caawin waayo barkimada kor loogu qaado.



Kursiga kor loogu qaado ama barkimada kor loogu qaado waxay caawiyaan in suunka kursiga saddex meelood ku xiran ee gaariga lagu hagaajiyo jirka ilmaha. Waa in aad hubiso in aad suunka si sax ah u giijsi – meel qoorta u dhow, lafta shafka ka gudbo bowdahana u dhaadhaco kana gudbo (waa in uusan caloosha ka gudbin). Haddii suunka laga gudbiyo caloosha, waxuu ilmuhu halis u gelayaa in uu jirka gudihiisa ka dhaawacmo haddii shil baabuur yimaaddo. Hadba sida ugu dhow ee suunka jirka loogu xiro, ayuu u kordhiyaa dhawrista ama badbaadada. Weligaa ilmahaaga ha u oggolaan in uu suunka hoos gashado killkisha ama gadaal iska mariyo!

**Kursiga kor loogu qaado mise barkimada kor loogu qaado?**

Farqiga u dhaxeeya kursiga kor loogu qaado iyo barkimada kor loogu qaado waxuu ugu badnaan khuseeyaa dhabar tiiriyaha kursiga kor loogu qaado. Haddii ilmuhu ku fadhiyo kursi aanan lahayn madax tiiriye, waxaa kuugu fiican kursiga kor loogu qaado. Labadan kursi ee badbaado si isku mid ah ayay nabad u yihiin haddii ilmaha si fiican sare loogu fariisiyo, oo suunka si hagaagsan loogu xiro. Kursiga kor loogu qaado waxuu weliba uga fiican yahay marka safar dheer loo baxo goortasoo ilmahaagu seexdo, maxaa yeelay waxuu si hagaagsan u toosiyaa suunka babcan oo jirka ilmaha ayuu sare u taagaa. Dhanka kale, kursiga kor loogu qaado waxuu ka nabad yar yahay haddii ilmahaagu rabo in uu hore isku janjeeriyo si uu aragtiisa u dhaafiyo geesaha kursiga kor loogu qaado. Marka uu fadhiyo waa in ilmuhu dhabarkiisa saaro dhabar tiiriyaha, iyadoo suunku si fiican u qabanayo jirkiisa.

Barkimooyinka kor loogu qaado ee cusub, ee la ansixiyey ka dib bishii Febraayo 2017, waxaa loo isticmaali karaa oo keliya

carruurta ka dheer 125 cm. Hase yeeshee, barkimooyinkii hore waxaa loo ansixiyey carruurta ka gaaban.

**Bacda hawadu ku jirto**

Bacda hawadu ku jirto ee rakaabka waxaa marka hore loogu talagalay in lagu dhawro dadka dhererkoodu ugu yaraan 140 cm yahay. Wixii khuseeya rakaabka dhererkaas ka gaaban, xaaladaha qaarkood waxay bacda hawadu ku jirto ee buufisan u keeni kartaa dhaawac nafta halis geliya. Taas awgeed, haddii gaarigu leeyahay bacda hawadu ku jirto ee kursiga rakaabka, halkaas ma fariisan karo qof ka gaaban 140 cm haddii bacda hawadu ku jirto la demiyey mooyee. Noocyada gawaarida casriga ah qaarkood waxay leeyihiin bac hawo ku jirto oo weliba badbaadada u kordhisa carruurta dhanka hore u jeedda ee 140 cm ka gaaban; la xiriir shirkadda gaarigaaga samaysay si aad war dheeraad ah uga hesho nooca gaarka ah ee gaarigaaga.

Bacaha hawadu ku jirto ee geesaha ku xiran khatar uma leh carruurta.



# Gaadiidka dugsiga.

**Maalin walba, carruur farabadan ayaa dugsiga ku tagta gaadiidka dugsiga sababtoo ah masafooyinka dhaadheer ee ay u jiraan, ama sababtoo ah xaaladaha baabuurta halista leh ee ka jira dariiqa ay dugsiga u qaataan. Carruurta waxay xaq u leeyihiin darawallo karti xirfadeed leh, baabuur nabad ah, istaagyo nabad ah iyo dariiqyo nabad ah oo ay u qaataan kana soo qaataan istaagyada gaadiidka dugsiga.**

Raacidda gaadiidka dugsiga waxay u fiican tahay deegaanka waana nabad. Adiga waalid ahaan, waxaa muhiim ah in aad maskaxda ku hayso sida ay tahay xaaladda badbaadada dariiqa loo maro loogana yimaaddo istaagga, hareeraha istaagga iyo gudaha gaadiidka dugsiga laftigiisa. Sharci ahaan, baabuurta loo isticmaalo gaadiidka dugsiga waa in ay yeeshaan calaamad ama wax la siman oo sidaas iyaga loogu aqoonsado. Maxaa dheer, suurogal ma noqon karto in albaabbada laga furo baabuurka dhinaciisa bidix.

Carruur farabadan ayaa baska dugsiga u raacda, haddii ay tahay bas loo kireeyey in uu gaadiid dugsi noqdo, ama basaska dadweynaha ee caadiga ah. Rakaabku waa in ay isticmaalaan qalabka dhawrista ee baska ku rakiban, matalan suunka kursiga. Sharci ahaan, dhammaan dadka saddex

jir ka weyni waa in ay xirtaan suunka kursiga waqtiga ay ku fadhiyaan kursi suun leh. Darawalku waa in uu rakaabka ka wargeliyo in ay waajib ku tahay in ay isticmaalaan suumanka kuraasta.

Waa in darawalku hubiyo in rakaabka 15 jir ka yari ay xirtaan suumanka kuraasta.

---

## Muhiim in aad adiga waalidku maskaxda ku hayso!

- Waa maxay xaaladda istaagga carruurta laga qaado lana soo dhigo? Miyay u baahan yihiin in ay waddada ka tallaabaan?
- Waa maxay xawaaraha baabuurta maraysa halka ay carruurta sii joogaan?
- Miyay carruurta dhammaantood ku fadhiyaan kuraas suuman leh?
- Miyay carruurta yar yar haystaan barkimo kor loogu qaado oo ay ku fariistaan?
- Miyuu ilmuhu isticmaalaa suunka kursiga marka uu baska saaran yahay? Miyuu darawalku isaga taas xasuusiyaa?
- Miyuu darawalku baabuurka ku wadaa xawaaraha saxda ah?
- Miyuu gaadiidka dugsiga leeyahay qulfulka qalabka khamri sheegga?





# Baaskiil wadista.


**Baaskiil wadistu waa wax dhinacyo kaladuwan oo farabadan ku fiican, iyadoo u fiican ilmaha shakhsi ahaantiis iyo mujtamaca intiisa kale; laakiin dhulka baabuurta leh ayaa badi si xun ugu habboon carruurta baaskiil wadda – iyo xataa dadka qaangaarka ah ee baaskiil wada.**

Carruurta 12 jir ka yar badi ma leh xirfadaha aasaasiga ah ee loo baahan yahay si baaskiilka loogu wado dhulalka baabuurta leh ee dhib badan. Dhulka ay baabuurtu meeldhexaad ugu badan tahay, waalidka ama qof kaloo qaangaar ah ayaa ilmaha dugsiga ku geyn kara baaskiil marka ilmuhu 7 ilaa 8 jir gaaro. Hase yeeshee, waa in aad doorato in aad baaskiilkaaga ka degto oo aad lug ku marto isgoysyada waddada lagaga tallaabo. Wixii khuseeya baaskiil ku wadista dhulka baabuurtu ku sii badan tahay, waa in aad sugto xoogaa sano oo dheeraad ah.

Baaskiilka waxaa loo arkaa baabuur. Sharci ahaan, waa in uu yeesho jalas iyo bareeg. Waa in uu weliba iftiinno ku yeesho xagga hore iyo xagga dambe, iyo weliba soo celiyeyaasha iftiinka oo kaga yaalla dhanka hore, dhanka dambe, iyo geesyada shaagagga, haddii baaskiilka la isticmaalayo ka dib marka dhulku madoobaado.

Waxaa weliba fiican in la isticmaalo quful calaamad leh (si tuugonimada la iskaga

ilaaliyo) iyo dahaarka silsiladda. Waxaa fiican in ilmahaagu ilaa inta suurogalka ah uu isticmaalo baaskiil leh bareeg lugta lagu qabto. Marka aad soo iibinayso baaskiilka ugu horreeya ee leh bareeg gacanta lagu qabto, waxaa muhiim ah in birta bareegga ee ku xiran shookaanka baaskiilku ay leekaato gacanta ilmaha. Sug ilaa ilmuhu dhowr sano ka galayo dhowr iyo toban jirka ka hor inta aadan u soo iibin baaskiil dhowr geer leh.



### **Koofiyadda adag ee baaskiilka**

Madaxu aad ayuu u dabacsan yahay, oo xataa jugta meeldhexaadka ah ayaa maskaxda waxyeellayn karta. Dhaawacyada lafta madaxa ayaa ah nooca dhaawaca ee ugu daran; waxay ugu badnaan saameeyaan baaskiil wadeyaasha aanan koofiyad adag xiranin.



Waxuu sharcigu dhigayaa in dhammaan carruurta iyo dhallinyarada 15 jir ka yari ay xirtaan koofiyad adag marka ay baaskiil wadaan ama baaskiil lagu sido. Waxaa habboon in runtii dadkoo dhan, da' kastoo ay yihiin, ay xirtaan koofiyadda adag ee baaskiilka marka ay baaskiil wadaan.

Koofiyadda adag ee baaskiilka waxaa la isticmaali karaa qiyaas ahaan 10 sano, haddii aanay jug weyni ku dhicin – markaas waa in islamarkaaba la beddelo. Soo iibi koofiyad adag oo ilmahaaga leeg, ha soo iibin koofiyad adag oo ilmahaagu u koro.

Qaar farabadan oo ka mid ah shilalka jug u geysta madaxa baaskiil wadeyaasha waxaa ku timaadda jug gaarta foodda iyo dhafoorrada. Taas awgeed ayay muhiim u tahay in koofiyadda adag ay toos madaxa ugu fadhido oo ay si fiican u qabato madaxa, iyo in ay daboosho foodda, gadaasha madaxa iyo korka. Hubi in koofiyadda adag ay leedahay calaamadda CE.

### **Halkee habboon in dadka lugaynaya ay maraan oo halkee habboon in baaskiil wadeyaashu ay baaskiilka ku wadaan marka ay marayaan dariiq loo wadaago lugta/baaskiilka?**

Dadka lugaynaya ee maraya dariiq loo wadaago lugta/baaskiilku waa in ay ku eekaadaan dhanka bidix marka ay u jeedaan jihada ay u socdaan inta suurogalka ah, si ay indhaha uga eegi karaan baaskiil wadeyaasha ka hor imanaya. Waxaa xeerkan lagu qeexay sharci baarlamaaneed oo laga yaabo in la dejiyo sanadka 2018. Shuruucda baabuurta waddada maraysa ee waddanka Iswiidhan ayaa hadda dhigaysa in dadka lugaynaya ee maraya qarka ama waddadu ay ku eekaadaan dhanka bidix ee ugu shisheeya marka ay u jeedaan jihada ay u socdaan, haddii ay suurogal tahay.

Waa in baaskiil wadeyaashu ay dhanka midig ku eekaadaan marka ay u jeedaan jihada ay u socdaan.



# Socodka.

**Waxaa sii badanaya carruurta, gaar ahaan kuwa yar yar, ee dugsiga baabuur lagu geeyo. Marka carruurta baabuur dugsiga lagu geeyo waxay taasi baabuurta ku sii badisaa dugsiga hareerihisa waxayna sii kordhisaa walaaca ay waalidiintu ka qabaan badbaadada iyo amniga carruurtooda.**

Marka lagu daro waqtiga yar ee ay ciyaaraha sboortiga ka qayb qaataan, jimicsiga yar ee ay helaan marka ay dugsiga tagayaan kana imanayaan ayaa kordhiyey carruurta culayskoodu xad dhaaf yahay ee mararka qaar si khatar ah u cayilan. Inkastoo ujeeddo fiican laga leeyahay caadada carruurta baabuur dugsiga lagu geeyo, haddana waxay isku rogi kartaa dhaqan xun oo aanan laga hari karin. Waalidiintu waxay carruurtooda baabuur dugsiga ugu geeyaan si aanay iyaga baabuur ugu dhufanin waalidiinta carruurta kale, haddana marka ay sidaan sameeyaan waxay qayb ku yeeshaan korodhka baabuurta iyo yaraanshaha nabadda dhulka dugsiga ku hareersan.

## **Baska dugsiga ee socodka**

Hab fudud oo lagu kordhin karo waalidiinta carruurtooda dugsiga lug ku geeya waxa weeyaan in la bilaabo waxa la yiraahdo baska dugsiga ee socodka. Xoogaa qoys oo iskugu dhow dariiqa dugsiga loo maro ayaa midba mar dugsiga u lugayn kara oo carruurta ka qaadi kara dariiqa ay marayaan. Markaas qof qaangaar ah ayaa carruurta maalin walba la lugaynaya, waxaanad midkiinba mar masuul ka noqon doontaan carruurta dugsiga la geynayo.

## **Dalabyo ka samayso dhulka baabuurta leh ee ilmahaagu maro**

La hadal deriskaaga ama waalidiinta carruurta ay ilmahaaga isku fasal yihiin oo kala hadal dhinaca aad rabto in aad ka wanaajiso dhulka baabuurta leh. Waxaa la filayaa in aad waxyaabo kaladuwan rabtaan oo aad xaaladda siyaabo kaladuwan u aragtaan. Ka wada hadla sida aad dadkoo dhan ugu wanaajin kartaan dhulka baabuurta leh.

- Wada lugeeya dariiqa la maro oo ka wada hadla sida baabuurto dhulka u maro. Diiwaangeliya, gacanta ku sawira oo sawirro ka qaada waxa aad rabtaan in aad hagaajisaan. Waxaa aad muhiim u ah in aad carruurta ka qayb gelisaan wadahadalkiina. Waxay iyaga laftigoodu hayaan fikrado ahmiyad badan oo ay ku sheegi karaan waxa ay rabaan in la

beddelo iyo waxa iyaga la xun ee ay ku arkaan dhulka baabuurta leh.

- Soo ogaada cidda waddada masuul ka ah. Waxay noqon kartaa Maamulka Gaadiidka Iswiidhan, magaalada, milkiilaha hantida ama hantiilaha, iskaashatada guryeynta ama bulshada.
- Qora warqad shacabka u furan oo aad ku sheegtaan ra'yigiina ama fikradihina. U dira hay'adda waddada masuul ka ah. Dib ula socda oo hubiya in warqaddiinu ay gaartay cidda habboon, oo soo ogaada goorta arrinka wax laga qaban doono.





## Soo celiyeyaasha iftiinka

Xirashada soo celiyeyaasha iftiinka ayaa dadka u fududaysa in ay adiga ku arkaan, taasoo yaraysa halista shilka. Soo celiyeyaasha iftiinka looguma talagalin uun dariiqyada baadiyaha ee madow. Waxaa muhiim ah in soo celiyeyaasha iftiinka la xirto marka la dhax marayo baabuurta magaalada, inkastoo ay dariiqyadu iftiinno leeyihiin. Shilalka dadka lugaynaya ay galaan intooda ugu badan waxay ka dhacaan xaafadaha magaalada ee iftiin dariiqyada ku leh. Sababaha taas keena waxaa midkood loo maleeyaa in dadka lugaynaya qaar farabadan ay u qaataan in la arki karo, xataa haddii aanay runtii baabuur wadeyaashu iyaga arki karin. Soo celiyaha iftiinka ee fiican waxaa laga arki karaa meelaha madow, ama marka aanan dibadda si fiican wax loogu arki karin, marka uu ku dhaco iftiinka nalka hore ee baabuurku. Soo celiyeyaasha iftiinku waxay soo celiyaan iftiinka xoogga leh ee iyaga ku dhaca. Iyaga ku xiro meel hoose oo ay kaga dhici karaan iftiinada nalalka hore ee baabuurta.

Waa in soo celiyeyaasha iftiinka weliba laga arki karo dhowr dhinac. Haddii aad dhar madow xiran tahay, darawalka iftiinka

yar isticmaalaya waxuu kaa arki doonaa masafo u dhexeysa 20 ilaa 30 mitir, laakiin haddii aad xiran tahay dhar midab khafiif ah leh waxuu kaa arki doonaa masafo 60 mitir ah. Hase yeeshee, qofka xiran soo celiyeyaasha iftiinka waxaa laga arki doonaa masafo 125 mitir ah.

Dharka ay carruur farabadan dusha ka xirtaan waxaa soo raaca soo celiyeyaasha iftiinka oo si joogto ah ugu tolan marada. Xasuuso ka dib marka dhowr jeer la mayro ama la dhaqo, in maradu ay dabacdo oo ay naaqusanto awoodda soo celinta iftiinku. Xataa soo celiyeyaasha iftiinka ee lagu sito jeebka jaakadka ayaa waqti ka dib lumiya soo celinta iftiinka, taasoo badi ka timaadda fureyaasha ama shayada kale ee iyaga xoqa. Taas awgeed ayaad ugu baahan tahay in aad si joogto ah u beddesho soo celiyeyaasha iftiinka.



# Shayada lagu ciyaaro ee la fuulo iyo alwaaxda heehaabka.

## Shayada lagu ciyaaro ee la fuulo

Shayada lagu ciyaaro ee la fuulo waxaa lagu tilmaamaa baabuurta aanay suurogal u ahayn ama aanan la oggolayn in lagu wado xawaare ka badan 6 km/saacad (qiyaas ahaan xawaaraha lugaynta).

Haddii baabuurku matoor leeyahay, waa in uu kaasi ahaado matoor koronto ku shaqeeya. Shayga lagu ciyaaro ee la fuulo waxaa loogu talagalay carruurta ilaa 14 jir ah. Noocyada ugu badan ee shayga lagu ciyaaro ee la fuulo ee dibadda lagu isticmaalo waa gawaarida carruurta iyo alwaaxda shaagagga leh.

Ilmaha isticmaala shayga lagu ciyaaro ee la fuulo waxaa saaran isla waajibaadka qofka lugaynta marka uu baabuurta dhex marayo: waxaa looga jeedaa, waa in uu ku jiro dariiqa lugta lagu maro, ama dhinaca bidix kaga eekaado waddada haddii uusan jirin dariiq lug lagu maro. Taas awgeed, waa in qof qaangaar ahi uu ilaaliyo ilmaha saaran shayga lagu ciyaaro ee la fuulo.

Xeerasha lagu maamulo socodka ama lugaynta ayaa iyaguna qabanaya dadka isticmaala kabaha shaagagga isku taxan leh ama wixii la siman. Hase yeeshee, qofka ku socda xawaare ka sarreeya xawaaraha lagu lugeeyo waa in uu dhanka midig kaga eekaado waddada marka ay taasi ka hagaagsan tahay. Gaariga carruurta ama gaariga yar ee uu ku rakiban yahay matoor koronto ku shaqeeya ee ku socon kara xawaare ka sarreeya 6 km/saacad ma aha shay lagu ciyaaro oo la fuulo, kumana habboona carruurta.

## Alwaaxa heehaabka

Alwaaxa heehaabku waa alwaax la isku dheellitiro oo leh labo shaag iyo matoor koronto ku shaqeeya. Alwaaxu waxuu u eeg yahay alwaaxa shaagagga leh, laakiin marka la wado dhinaca dheer ayaa dhanka hore u jeeda. Xawaarihiisa ugu badani

waxuu ku xaddidan yahay 20 km/saacad.

Alwaaxa heehaabka waxaa loo arkaa baaskiil, taasoo ka dhigan in ay qabanayaan isla shuruucda baabuurta waddada maraysa ee u yaalla baaskiillada caadiga ah. Tusaale ahaan, waa in uu yeesho bareeg iyo jalas (waxaa la aqbali karaa in aad jalaska gacantaada ku hayso). Alwaaxa heehaabka waa in lagu wado dariiqa baaskiilka loogu talagalay, marka la heli karo, ama haddii kale qarka. Carruurta 15 jir ka yari waa in ay koofiyyad adag xirtaan.

A hoverboard that exceeds 20 km/h for example, falls under the heading of “other vehicles,” meaning that it may not be operated in traffic.



Shutterstock/Dreamstime.com/Photo



# La soo xiriir **ururradayada**

Blekinge: **blekinge.ntf.se**

Dalarna: **dalarna.ntf.se**

FyrBoDal: **fyrbodan.ntf.se**

Gotland: **gotland.ntf.se**

Gävleborg: **gavleborg.ntf.se**

Halland: **halland.ntf.se**

Jämtland: **jamtland.ntf.se**

Jönköping: **jonkoping.ntf.se**

Kalmar: **kalmar.ntf.se**

Kronoberg: **kronoberg.ntf.se**

Norrbottnen: **norrbottnen.ntf.se**

Skaraborg: **skaraborg.ntf.se**

Skåne: **skane.ntf.se**

Stockholm: **stockholm.ntf.se**

Sörmland: **sormland.ntf.se**

Uppsala: **upsala.ntf.se**

Värmland: **varmland.ntf.se**

Väst: **vast.ntf.se**

Västerbotten: **vasterbotten.ntf.se**

Västernorrland: **vasternorrland.ntf.se**

Västmanland: **vastmanland.ntf.se**

Örebro: **orebro.ntf.se**

Östergötland: **ostergotland.ntf.se**



Baabuur nabad ah